

Sharciga caafimaadka- iyo daryeelka jirooyinka ayaa sheegaya in:

Shaqaalaha daryeelka caafimaadku inay fiiro gaar ah u yeeshaan carruurta qaraabada ah iyo baahida ay u qabaan macluumaadka, talooyinka iyo taageerooyinka marka uu waalidka ilmaha ama qof kale oo weyn oo ay si joogto ah ula nool yihiin uu dhinto ama uu.

- jirka ka qabo jirro ama dhaawac halis ah
- jirro maskaxeed ama naafo ah
- yahay qof balwad leh ama uu yahay qof xanuun la nool
- xoog ku muquuniya ilmaha ama qof u dhow ilmaha oo qaraabo la ah

Gobolka Skåne waa in ilmaha sidaas si la mid ah looga digtoonaadaa haddii walaalaha uu mid qabo dhibaatooyinka caafimaad ee kor ku xusan.

Weydiiso fadlan shaqaalaha caawimo

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida aad ula hadlayso carruurta, kelmadaha aad isticmaali karto, macluumaadka aad rabto inaad siiso, shaqaalaha daryeelka ayaa kaa siin kara taageero.



**Carruurta qaraabada ah
Gobolka Skåne**

Boggag websaydyo ah oo loogu talagalay akhris dheeraad ah ee ku saabsan iswiidhishka iyo carruurta qaraabada ah:

Hagaha daryeelka caafimaadka 1177.se

- Qaybta Markay nolosha qoysku adtaato
- Qaybta Markuu dareenka waalidku xumaado
- Marka qof weyn oo qoyskaaga ka mid ahi aanu fiicnayn

Xarunta aqoonta Qaraabada (NKA)


[Carruurta qaraabada ah | Xarunta aqoonta Qaranka \(anhoriga.se\)](http://Carruurta qaraabada ah | Xarunta aqoonta Qaranka (anhoriga.se))

Meel lagu qoro faahfaahinta xiriirarada:

Markuu qoysku leeyahay carruur aan qaan-gaadhin iyo dhalinyaro

Carruurta way saamaysaa markay waalidiinta, walaalaha ama qof kale oo qoyska ka mid ahi uu jirran yahay ama uu naafo yahay. Xitaa ilmaha yari wuu dareemayaa in aanay wax waliba ahayn sidii caadiga ahayd.

Carruurta waxay u baahan yihiin inay ka qaybqaataan oo ay ogaadaan waxa qoyska ka dhex dhacaya. Waa muhiim in ilmaha lagala hadlo xaaladda qoyska si aanu ilmuhu u qaadin ama u xambaarin welwel iyo mala awaal uu keligiis ku noqdo.



Carruurtu waxay rabaan inay ogaadaan

Carruurta waxay noqdaan oo ay ku lug yeeshaan inay qayb ka noqdaan si ay siyaabo kala duwan uga helaan warbixin, iyadoo lagu salaynayo da'da iyo qaan-gaarnimada, iyo iyagoo fursad loo siinayo inay ka hadlaan sida arrimaha qoysku u shaqeeyo.

Ku dhiirgeli ilmaha inuu kuu raaco booqashooyinka daryeelka caafimaadka, haddii ilmuhu rabo. Isku diyaari inaad kala sii hadasho deegaanka daryeelka caafimaadka. Waxa laga yaabaa inay carruurta mararka qaarkood rabaan inay wax u diraan rugta qaabbilaada daryeelka ama isbitaalka, tusaale ahaan madax-kuti boombalo ah (nale) ama waxyaabo ay sawireen.

In lala hadlo ilmaha

Habka wanaagsan ayaa ah in marka hore la ogaado waxa ilmuhu ka ogyahay xaaladda xubinaha qoyska iyo waxa ka dhex dhacaya. U oggolow inuu ilmuhu ra'yi ka bixiyo isagoo ka sheekaynaya dareenka uu ka qabo iyo isagoo su'aalo ku weydiinaya. Iskuday inaad si daacad ah uga jawaabto su'aalaha. Haddii aanad garanayn jawaabta, waa iska caadi inaad sidaas ugu sheegto.

Carruurta qaarkood dadka waxba ma weydiiyaan, laakiin taas macnaheedu maaha in aanay wax su'aalo ah qabin. Carruurta waxay u baahan karaan wakhti su'aaluhuna mararka qaarkood muddo ka dib ayay yimaadaan. Waydii fadlan *su'aalaha* ilmuhu qabo, halkii aad ka waydiin lahayd haddii ilmuhu wax su'aalo ah qabo. Carruurta waxa lagu dhiirgelin karaa *inay qoraan* su'aalahooda.

Su'aalaha ayaad qabtaa?

Carruurta qaarkood ayaa gef ama khalad ka dareema waxa dhacaya. Waa muhiim in ilmaha loo caddeeyo in xanuunka ama xaaladda ay xubinta qoysku ku sugan tahay aanay ahayn gef ama khalad uu ilmuhu keenay!

Haddii ay jiraan dhawr carruur ah oo qoyska ka tirsan, waxaa wanaagsan in laga fekerin in lagala hadlo si xitaa

carruurta yaryari ay u fahmaan. Mararka qaarkood waxaa loo baahan karaa wada hadal gaar ah iyadoo lagu salayano da'da iyo baahiyaha kala duwan ee carruurta.

Dhageyso inta uu ilmuhu awoodi karo. Sii fursad si aad wada hadalo iyo macluumaadyo soo noqnoqda aad u samaysaan.

Maxaa fududayn kara nolol maalmeedka?

Iskuday in aad ilaaliso rootiinka/nidaamka carruurta iyo waxa ay xiiseeyaan nolol maalmeedkooda intii suurtoogalka ah. Aaditaanka dugsiga xannaanad ama dugsiga/iskuulka, sii wadida aktiifiteetyada, la kulanka saaxiibada iyo samaynta waxyaabaha wanaagsan ayaa badanaa u fiican ilmaha

Waxa kale oo xitaa suurtoogal ah in taageero laga helo daryeelka caafimaadka, daryeelka caafimaadka ardayda ama degmada marka uu culayska weyni qoyska soo wajahu. Fadlan wargeli qof ka shaqeeyo dugsiga xannaanada ama dugsiga haddii uu ilmuhu kalsooni ku qabo xaaladda hadda ka jirta qoyska dhexdiisa.

Carruurta qaarkood ayaa mas'uuliyad weyn iska saara qofka weyn, xubnaha kale ee qoyska iyo qoyskaba. Waxay noqon kartaa mas'uuliyad aad u culus oo ay muhiim tahay in laga kor qaado ilmaha. Haddii kale waxay si xun u saamayn kartaa caafimaadka iyo korriinka ilmaha

Ka falcelinta carruurta

Dadka oo dhami way kala duwan yihiin, oo xitaa ay ku jiraan carruurta, sidaas darteed carruurta siyaabo kala duwan ayay uga falcelin karaan marka loo sheego jirro ama naafonimo ku saabsan xubin qoyska ka mid ah. Carruurta qaarkood way murugoodaan, qaar kalena uma muuqdaan inay ka falcelinayaan gabi ahaanba. Dareenka ka falcelintu wuxuu inta badan ka tarjumayaa heerka korriinka ilmaha. Isla hal ilmo ayaa sidoo kale muujin kara falcelinno kala duwan wakhtiyo kala duwan. Carruurta qaar ayaa kaga falceliya aamusnaan iyo caajisnimo halka ay qaar kale kaga falceliyaan xanaaq badan ama rabshado iyo carro. Ka falcelinada noocyada kala duwan ahi ma aha wax laga welwelo, haddii ilmuhu u muuqdo inuu yahay mid asal ahaan fiican. Haka walaacin inaad

raadsato caawimo dad xirfad u leh arrimahan haddii aad ka welwelsan tahay ilmahaaga.

Haddii ilmuhu xumaan dareemayo

Carruurta maskaxda ka jirran waxay muujin karaan isbeddello dabecadeed iyo calaamado kala duwan oo inta badan soo noqnoqda, tusaale ahaan:

- calool xanuun
- madax xanuun
- murqo xanuun
- inay ku adkaato isku taxallujintu
- hurdo xumaan
- dhibaatooyin kaga yimaada dugsiga xannaanada ama dugsiga/iskuulka

Tusaale ahaan meelaha ama meheradaha lala xiriirinayo da'da carruurta ee kala duwan:

Ilmaha 0–5 sano:

- BVC – Rugta xannaanada carruurta
- Dhakhtarka cilminafsigu wuxuu ka hawlgalaa rugta umulsooyinka iyo BVC Rugta xannaanada carruurta
- Xarunta daryeelka caafimaadka
- Adeegyada arrimaha bulshada (ka codso taageero)

Carruurta iyo dhalinyarada 6-17 sano:

- Caafimaadka ardayda - Daryeelka caafimaadka dugsiga/iskullka
- Xarunta daryeelka caafimaadka
- Qaybta qaabbilaada soo dhawaynta dhalinyarada (12-23 sano)
- Jidka loo maro, la talinta dhinaca telefoonka ee carruurta iyo dhalinyarada ee Skåne ee ku saabsan cudurka dhimirka. Waalidiinta, iyo xitaa sidoo kale ilmaha laftiisa, ayaa wici kara halkaas. Lambarka telefoonka 020-51 20 20
- Adeegyada arrimaha bulshada (ka codso taageero)